

Kawaran haddii aanan qaadan tallalka BCG?

Xiitaa haddii aad hore u soo qaadatay tallalka BCG, waad qaadan kartaa baadhitaanka TBda ee maqaarka.

Dadka soo qaatay tallalka BCG, way qaadi karaan cudurka jeermiska TB.

Waa maxay Bacillus Calmette-Guerin (BCG)?

BCG waa tallaalka lasiiyo dadka si ay uga ilaalisoo cudurka TB. BCG **LAGUMA** isticmaaloo kahortagga TB

Maraykanku. Badanaaba waxa la siiyaa wadanada kale ee ay TB ay caanka ku tahay. Irmadda ama daawada BCG kuma "siinayso TB.



Maxaa la ii siiyaa BCG?

Badanaaba wadanada TB ay ku badantahay ama ay caanka ku tahay ayaa BCG ilmaha iyo caruurta yar-yar la siiyaa si ay uga ilaalisoo in ayna aad ugu xanuusan cudurka tiibiida TBda. Dadka waawayn kama ilaalisoo tiibiida.

Wax ma tartaa BCG?

Waxa adduunka lagu isticmaalaa noocyo badan oo BCG. Qaarkood wax ya rabay ka ilaalisaa mid ka mida cudurka tiibiida (TBda) cudurkaa ka abuurma agagaarka maskaxda carruurta yaryar. Loomana malaynayo in ay cudurka ka ilaalin karto muddo badan kadib marka la siiyo. Laakiin BCG qaar ma siin ilaalin kahortag habayaraatee

Muddo intee dhan bay tallalka BCG ku dhamaataa?

Kaba soo qaad haddii ay wa tarto Irbada ama daawada BCG, sida caanka ah waxay wax tari doontaa oo ay cudurka qofka ka ilaalin doontaa muddo 5 ill 10 sannadood ah. Sidaa darteed Irbadda BCG aad qaadatay caruurnimadii waad qaadan kartaa mar kale tallalka cudurka TBda goorta aad qof wayn noqoto.

Haddii aan tallalka BCG hore u qaatay hadana ma qaadi karaa cudurka TB?

Haa. Baadhitaanka maqaarka ayaa muujinaya jeerimska (TBda) jidhkaaga gudhiisa ku jira. Haddii jeermiska TB jidhkaaga ku jiro, baadhitaanku wuxu caddaynayaa cudurka.

Tallalka BCG iyada cudurka TBda ma ka qaadi karaa ama ma iga dhigi kartaa mid qaba cudurka TBda?

Haddii tallalka BCG muddo hore lagu siiyay, aadbay imika u suurto gal tahay in uu jidhkaaga ku jiro jeermiska TBda.

Xaqiijinata badhintaanka maqaarku cadeeyay tiibiida TBda mawaxay sheegaysaa in ay tallalka BCG shaqaynayso?


Maya. Xaqiijinata badhintaanka maqaarku cadeeyay tiibiida TBda waa aad bay u suurto gal tahay in uu jidhkaaga ku jiro jeermiska TB.

Warka fiicanse wuxuu yahay!

Haddii aad qabto TB oo uu ku jiro jidhkaaga, waxa aad qaadan kartaa imika daawooyinka si aad u caafi-maad qabto.



Waa maxay TB?



Tuberculosis Clinic

Preston Family Building, 5th Floor
732 Harrison Avenue
Boston, MA 02118

Telephone: (617) 534-4967 (Balan ahaan)
(617) 534-4875 (alaalisada)

Waa maxay TB?

“Tbiidu” Waa cudur magaciisa la soo gaabiyay o lagu magacaabo tuberculosis wuxuuna ku faafaa jeermis yar oo hawada raaca ama lasabbeeya. Goorta qof TBii qabaa qufaco, hindhiso ama uu dhawaaqo xillii-gaasay ku rushaynayaan jeermiskaas hawada. Haddii uu qofakale uu dib u neefsado jeermiska, waxay qaadi karaan xanuuna loo yaqaano (TB). TB iidu waxa aad dareemaysaa daal, qufaca badan, xummad iy dhidid habeenkii aad yeelato. Dadka badidiisu waxay u haystaan TBda in uu ku dhaco ama waxa yeelo Sambabka. Xitaa iyadoo 70% kuwa ay ku dhacday Tbiidu in ay ku leeyihiin sambabka jeermis, Tbiidu waxa kale oo ay ku dhacadaa meelo kale oo jidhka ka mida sida lafaha, maskaxda ama wad-nahaba.



Dadka qaarkood waxay jidhkooda ku leeyihiin jeermiska TBda, laakiinse kuma xanuusadaan. Kan waxa lagu magacaabaa ka qarsoon ama “hurdaaye” waa infakshanka TBda. Dadku xanuunbay dareemaan, kadibna xanuun muuqda oo TBda ah ayaa ku dhaca.

Waa maxay waxa u dhaxeeya TBda “huruda” iyo TBda firfircoon ee “soo jeedda”?

Cudurka qarsoon ee loo yaqaano Tuberculosis (LTBI) waxa kaloo loo yaqaanaa “TBda **hurudda**” sabab-tuna waa hurdada uu hurdo jeermisku inta uu jidhkaagu la dagaalamayo oo uu iska celinayo. Waxa laga yaabaa in baadhitaanku muujiyo in aad qabto TBda hadana aanay jirina staamaha inuu firfircoon yahay. Ma qaadsiiin kartid cidkale, laakiinse haddii aad daawooyinka TBda qaadato waxa suurtoobi karta in anu jeermisku soo toosin oo aan dib u soo kicin.

Jeermiska TBda ee firfircoon (**soo jeeda**) ee sambabka ama qaybaha kale ee jidhka ku jiraa way firfircoonyihiin waxayna ku keeni karaan xanuun. Waxaanad ku gudbin kartaa adigoo qufaca, hindhisa, xoog u dhawaaqa taas oo hawadu ay qaadayso dadkii kalana sidaa ugu gudbinaysoby jeermiska iyaga oo hawadaa jeermiska sidda ku neefsanaya.


Calaamadaha jidhka ku dhaca gaarta ay Tbiidu soo firfircoonaato ama soo shac baxdo waxaa ka Sidee baan ku ogaan karaa in aan qaaday ama qabo TBda?

Dhinaca jidhka	Calaamadaha lagu garankaro
sambabka	qufac, korodhka khaakhada (malax), dhiig aad la qufaco
dhinaca qoorta	buro qoorta ka soo baxda
lafaha	xanuun lafaha ama dhabarka
madaxa	madax xanuun, xanuun aad dareento goorta aad madaxa dhaq- dhaqaajiso, qoorta oo ku figaysanta am adkaata, xummad

Baadhitaan yar oo gacanta ah (Baaritaanka TB ee maqaarka) ayaa sheegaya in aad jeermiska TBda in uu jidhkaaga ku jiro. Baadhitaanka TBda firfircoon ee maqaarka jidha sida layaqaano waxa weeyi in aad qaaday jeermiska TBda. Baaritaanka dhiigga ayaa iyana loo adeegsada haddii uu jeermiska TB ku jiro jirkaaga. Waxa aad u baahnaan doontaa baadhitaan dheeraad ah sid laabta ama xabadka oo kale. x-ray or sputum (phlegm) test.


Kawaran haddii aan qabo TB?

Si aad u caafimaado waa in aad daawooyinka qaadato. TB waa la daawayn karaa! Laakiinse haddii aad qaadan waydo daawooyinka, TB aad baad u dareemaysaa xanuunka. Xiitaa haddii aad dareento caafimaadqab goorta aad qaadato daawooyinka, **ha joojin** qaaddashada kiniiniga illaa uu dhakhtarku ama kalakaalisadu kuu sheegto in aad joojiso, haddii aad daawooyinka hore u joojiso, jeermiskii tiibiidu TBda wuu soo noqon karaa aad bayna u adagta-hay in lala dagaalamo.



Waa maxay baadhitaanka TBda ee maqaarku?

Baadhitaanka TBda ee maqaarku waa goorta irbad daawo yar leh maqaarka hoostiisa oo gacantaad ah lagu mudo. Maqaarka wuu soo bararaa waxayna ku baaba’aan muddo 5 illa 10 mirir inta u dhaxaysaa. Aad bay muhiim u tahay in aad dib dhakhtarkaaga ugu noqoto 2 illaa 3 maalmood (48-72 saacadood) guda-hood ee kadib irbadda ka-dib si loo eego gacantaada in oo loo ogaado in uu baadhitaanku muujiyay cudurku jiro iyo in aanu cudurku jirin-ba.



Aad bay ugu muhiim u tahay in dhakhtarka ama kalkaalisada in ay u arkaan badhitaanka maqaarkaaga 48 illaa 72 saacadood baadhitaanka kadib

Sidee baan u daryeelaa gacantayda baadhitaana kadib?

- Ha ku duubin maro iyo wixii lamida meelaha finanku kaa soo baxeen.
- Ha duugin hana xoqin meelaha finanku ku yaalaan.

Kawaran haddii uu baadhitaankatiibiida TBda ee maqaarka jidhku waxba sheegi waayo?

Xaaladaha Intooda badan, haddii finan ama barar laga waayo meelihii baadhitaanka lagu samaeeyay, waxa suurtoobi karta in aanad qabin oo aand qaadin tiibii TB. Dhakhtar ama kalkaalisada waa in ay eegto oo hubi-so.

Maxaa dhici doonaa haddii baadhitaanku sheego TBii tiibii?

Haddii badhitaanku uu xanuunka sheego waxa gacantaada meeshii baadhitaanka lagu sameeyay ka muuqan doona barar. Kaasina wuxu muujinayaa in aad jeermiska TBda uu jidhkaaga ku jiro. Dhakhtar ama kalkaalisada ayaa eegi doonta jidda si loo qiyaaso xajmiga. Waxa laga yaabaa dhakhtarkuna in uu baadhitaan kale sameeyo si uu u ogaado meesha uu jeermisku jidhka ka-ga jiro.